

Ra'yi uruurinta Caafimaadka Bulshada Oslo 2024

Miyaad ka heshay iimayl iyo/mise farriin qoraal oo ka timid Magaalada Oslo oo lagugu casuumay inaad ka jawaabto ra'yi uruurinta caafimaadka Bulshada? Waa ammaan inaad gujiso iskuxirka.

Jawaabahaaga muhiim ayay inoo yihiin

Waxaynu jeclaan lahayn inaan ogaanno caafimaadkaaga iyo badqabkaaga. Jawaabahaaga waa muhiim, maxaa yeelay waxay awood inoo siinayaan inaan ka shaqayno sidii aan u noqon lahayn magaalo caafimaad qabta taasoo qof waliba siinaysa nolol tayo wanaagsan leh. Waxaan rajeyneynaa inaad doonayso inaad ka qaybqaadato.

Waxaa lagu xushay si aan kala sooc lahayn, adiga iyo ilaa 160,000 kaloo daggan Oslo. Sambalka ayaa ka tarjumaysaa dadka Oslo, markaa jawaabahaagu waa inoo muhiim.

Maxaynu wax kaa waydiin doonaa?

Waxaan rabnaa inaan ku weydiino arrimo kala duwan oo saamayn kara caafimaadkaaga iyo tayada noloshaada. Waxay qaadataa qiyaastii 20 daqiiqadood si aad ku dhammaystirto ra'yi uruurinta.

Sidee ra'yi uruurinta loo qabtaa?

Ra'yi uruurintu waa dijitaal. Ka qaybqaatayaasha waxay heleen iimayl wata iskuxirka Ra'yi uruurinta. Iskuxirka waa mid shakhsi ah islamarkaana aad adiga oo kaliya dhammaystiro doonto.

Waxaad sidoo kale kaydsan kartaa jawaabahaaga xilli walba islamarkaana aad qayb-qayb u dhammaystiri kartaa ra'yi uruurinta.

Ra'yi uruurinta waxaa qabanaya Verian oo wakiil ka ah Machadka Caafimaadka Bulshada Norway iyo Magaalada Oslo.

Hab sugan ayaa su`aalaha ugu jawaabi kartaa

Waxaan tixgelinaa amnigaaga! Jawaabahaaga waxa loo maarayn doonaa qaab aan la isticmaalin magacyo iyo lambarada aqoonsiga ee qofka u gaarka ah ama sifooyin shakhsi oo kale. Suurtagal ma noqon doonto in xogta Dowladda Hoose ee Oslo ay hesho iyo aqoonsigaaga laysku xiro. Natijada waxaa loo soo bandhigi doonaa koox koox ahaan, ee loola soo bandhigi doono shaqsiyeed ahaan. Waxaan danaynaa

badbaadada iyo amnigaaga. Ra'yi uruurinta waa qarsoodi, suurtagalna ma noqon doonto in jawaabahaaga dib laguugu soo celiyo.

Ra'yi uruurinta ayaa lagu heli karaa luqado kala duwan

Ra'yi uruurinta ayaa lagu turjumay Af-Ingiriis, Af-Carabi, Af-Soomaali, Af-Tigrinya, Af-Polish, Af-Urduu iyo Af-Yukreeniyaan. Markaad gasho Waxaad awood u yeelan doontaa inaad doorato mid ka mid ah xulashooyinkan.

Muuqaalka luqada dhagoolaha ee ku saabsan Ra'yi uruurinta Caafimaadka Bulshada Oslo ayaa sidoo kale la heli karaa.

Waxaad hadiyad ahaan ku guuleysan kartaa kaar qiimo leh!

Kadib markii su`alaha aad ka jawaabto, waxaad ka qayb qaadan kartaa isku aadka/baqtianasiib oo ka kooban 15 kaarar kuwaasoo qiimahooda yahay 2 000 NOK. Isku aadka/baqtianasiibka waxaa lagu dhaqaaqi doonaa kaddib markii sahanka la soo gabagabeeyo.

Ma u baahantahay in lagu caawiyo mise ma qabtaa su'aalo?

Fadlan la xiriiir: folkehelseundersokelsen@hel.oslo.kommune.no

Xaqiiqooyinka ku saabsan Sahanka Caafimaadka Bulshada Oslo 2024

Ra'yi uruurinta Caafimaadka Bulshada waxay hiigsanaysaa in la helo dulmar ku saabsan caafimaadka bulshada iyo arrimaha togan iyo kuwa tabanba ee saamayn kara caafimaadkeenna. Ra'yi uruurinta waxay ku salaysan tahay Machadka Caafimaadka Bulshada Norway ee sahanka caafimaadka bulshada gobollada Norway.

Oslo waxay markii ugu horraysay qabanaysaa Ra'yi uruurinta Caafimaadka. Gobollada kale ayaa qabanaya ra'yi uruurinta, taasoo macnaheedu yahay inaan awoodno inaan isbarbardhigno natiijooyinka Oslo iyo kuwa gobollada kale. Haseyeeshee, Oslo waa mid gaar ah, maadaama ay tahay caasimad, dagmo iyo gobolba, sidaas darteed waxaan sidoo kale ku soo darnay su'aalo u gaar ah Oslo.

Jawaabaha aan ka helno ra'yi uruurinteenna ayaa bixin doona sawir wanaagsan oo ku saabsan sida ay tahay in lagu noolaado magaalo buuxisa doorar badan.

Halka ka eeg natiijooyinka

Natijoooyinka ayaa la heli kari doonaa kadib marka la mariyo hannaan.

Wakaaladda caafimaadka Magaalada Oslo ayaa hubin doonta in dagmooyinka magaaloooyinka iyo xaafadaha kale ay isticmaali karaan natijoooyinka.